

JAMHUURIYADDA SOMALILAND
WASAARADDA GANACSIGA IYO DALXIISKA

DARAASAD KOOBAN

ISBADALKA QIIME EE ROODHIDA
MAGAALADA HARGEYSA



Taariikh: 7th -December -2021

HORUDHAC

Daraasaddani waxay ku saabsantahay xog ururin laga sameeyay isbadalka qiime ee ku yimid roodhida laydhka ee magaalada Hargeysa.

UJEEDADA DARAASADDA

- Qiimaha isbadalka Furinka iyo sababta keentay
- Qiimaha isbadalka Shidaalka iyo sababta keentay
- Qiimaha isbadalka raashinka iyo Sababta keentay
- Qiimaha gaadiidleyda qaada raashinka

HABRAACA XOG URURINTA (DATA COLLECTION METHODOLOGY)

Shaqaalaha Wasaaradda Ganacsiga iyo Dalxiiska ee qaabilsan lasocodka Meciishadda Dalka oo isticmaalaya Aaladda casriga ah ee KOBACOLLECT (Mobile Data Collection) ayaa waxay si kooban u soo kormeereen meheradahan hoos ku xusan:

- Meheradaha Wershedlayda Furinka
- Meheradaha Dukaamada iibiya Furinka
- Kaalmaha Shidaalka
- Bakhaarleyda iibiya Daqiiqda iyo Saliidda
- Gaadiidka qaada raashinka

Kooxda Xog ururiyaashu waxay kormeereen 14 Wershadood oo ku yaalla magaalada Hargeisa sida hoos ku xusan:

- Degmada koodbuur 8 warshadood
- Degmada 26 june 5 warshadood
- degmada Axmed dhagax 1 warshad

Sidoo kale , kooxda xog urintu waxay daraasad ku sameeyeen dukaamada iibiya roodhida. Tirada dukaamada kaqayb qaatay daraasadda waxay ahayd 32 dukaan, sida hoos ku xusan:

- Degmada Ibrahim Koodbuur 44%
- Degmada 26 June 56%

Hadaba, si loo fahmo isbadalka ku yimid qiimaha roodhida waxa lasameeyay is barbar dhig qiimaha roodhida bisha November-2021 iyo qiimaha roodhida bisha December-2021.

Waxa sidoo kale dib u eegis lagu sameeyay qiimaha meciishadda kale (daqiiqda, saliidda iyo shidaalka) ee bilihi hore.

MAXAA KA SOO BAXAY DARAASADDA?

- Waxa daraasadda si kooban oo guud mar ah uga soo baxay in dhamaan Wershedlayda Magaalada Hargeysa ay kordhiyeen qiimaha xabbada roodhida ah. Badankoodu waxay ku kordhiyeen SL\$500. Sidoo kale dukaamaduna ay kordhiyeen SL\$500.
- Qiimaha isbadalka roodhida waxa lagu sababeeyay kor u kac qiime oo ku yimid daqiiqda, saliidda iyo shidaalka.
- Waxa qiime korodh uu ku yimid daqiiqda, saliidda iyo shidaalka dalka.
- Gaadiidka qaada Raashinku waxa uu gadbaddii (50KG) ku qaadaa inta u dhaxaysa USD 0.5 – USD 0.8 (Berbera -Hargeysa)

QAYBTA KOOWAAD: QIIMAHA ROODHIDA WERSHADLEYDA

| S N | Magaca | Nov-21 | Dec-21 | Isbadal | Faraq | Boqollay |
|--------|---------------------------|--------|--------|---------|-------|----------|
| 1 | Tayo Bakery | 2,000 | 3000 | korodh | 1,000 | 50% |
| 2 | Tawfiiq bakery | 2,000 | 3000 | korodh | 1,000 | 50% |
| 3 | Yaxye bakery | 2,000 | 3000 | korodh | 1,000 | 50% |
| 4 | Hilaaal | 2,000 | 2500 | korodh | 500 | 25% |
| 5 | Alayaasir Bakery | 2,000 | 2500 | korodh | 500 | 25% |
| 6 | Idil bakery | 2,000 | 2500 | korodh | 500 | 25% |
| 7 | All baraka bakery | 2,000 | 2500 | korodh | 500 | 25% |
| 8 | Alla yaazir | 2,000 | 2500 | korodh | 500 | 25% |
| 9 | Jirde bakery | 2,000 | 2500 | korodh | 500 | 25% |
| 10 | Salaaxdiin bakery | 2,000 | 2500 | korodh | 500 | 25% |
| 11 | Alnour bakery | 2,000 | 2500 | korodh | 500 | 25% |
| 12 | Hodan Bakery | 2,000 | 2500 | korodh | 500 | 25% |
| 13 | Haldoor Bakery and Sweets | 2,000 | 2500 | korodh | 500 | 25% |
| 14 | Himilo Bakery | 2,000 | 2500 | korodh | 500 | 25% |

- 3 Warshadood, waxay kordhiyeen SL\$ 1,000.
- 11 Warshadood, waxay kordhiyeen SL\$ 500.

Sababta keentay Korodhka

- Korodh qiime oo ku yimid daqiiqda, Saliidda iyo Shidaalka.

QAYBTA LABAAD: QIIMAHA ROODHIDA DUKAAMADA

| SN | Magaca | Nov-21 | Dec-21 | Isbadal | Faraq | Boqollay |
|----|----------|--------|--------|---------|-------|----------|
| 1 | Dukaan1 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 2 | Dukaan2 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 3 | Dukaan3 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 4 | Dukaan4 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 5 | Dukaan5 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 6 | Dukaan6 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 7 | Dukaan7 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 8 | Dukaan8 | 2000 | 3000 | Korodh | 1,000 | 50% |
| 9 | Dukaan9 | 2000 | 3000 | Korodh | 1,000 | 50% |
| 10 | Dukaan10 | 2000 | 3000 | Korodh | 1,000 | 50% |
| 11 | Dukaan11 | 2000 | 2000 | Midna | 0 | 0% |
| 12 | Dukaan12 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 13 | Dukaan13 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 14 | Dukaan14 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 15 | Dukaan15 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 16 | Dukaan16 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 17 | Dukaan17 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 18 | Dukaan18 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 19 | Dukaan19 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 20 | Dukaan20 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 21 | Dukaan21 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 22 | Dukaan22 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 23 | Dukaan23 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 24 | Dukaan24 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 25 | Dukaan25 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 26 | Dukaan26 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 27 | Dukaan27 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 28 | Dukaan28 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 29 | Dukaan29 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 30 | Dukaan30 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 31 | Dukaan31 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |
| 32 | Dukaan32 | 2500 | 3000 | Korodh | 500 | 20% |

- Dukaankaliya ayaa ku iibinaya qiimahii hore ee bisha November-2021. Halka, dhamaan dukaamada kale oo dhan ay kordhiyeen SL\$500.
- 3 dukaan waxay ku iibinayeen Nov-21 SL\$2,000, balse, waxay kordhiyeen SL\$1,000. Waxayna ka dhigeen SL\$3,000.

Sababta keentay korodhka

- Waxa korodhka sameeyay Weshadleyda.

QAYBTA SADEXAAD: MECIISHADDA DAQIIQDA, SALIIDDA IYO SHIDAALKA¹

| SN | Maciishadda | Cabbir | Jan-March 21 | April-Sept-21 | Oct-Dec-21 |
|----|------------------|--------|--------------|---------------|------------|
| 1 | Daqiiq Masar | 50 KG | 24 | 26 | 26.5 |
| 2 | Daqiiq Omaan | 50 KG | 25 | 26 | 27 |
| 3 | Daqiiq Wadani | 50 KG | 25 | 25.5 | 26.5 |
| 5 | Saliid Omar | 20 LTR | 28 | 30.5 | 33 |
| 6 | Saliid Sunflower | 5 LTR | 7.5 | 9 | 9 |
| 7 | Petrol | 1 LTR | 5,486 | 6,400 | 7,000 |
| 8 | Deisel | 1 LTR | 5,000 | 5,200 | 5,700 |

Talo- soojeedin

- In ay macquultahay in ay kordhi karto qiimaha furinka lasiiyo ,maadaama dhamaan meciishadda kale ee laga sameeyo furinku ay korodhay. Inta ugu yar ee ku kordhi karta waa SL\$500 xabbaddii furinka ahayd. Haddaba,maadaama oo aanay jirin lacag sir-sir ah oo ka yar SL\$500 oo la isticmaalo si looga sii hoosey siiyo, Furinleydu waa inaanay ku kordhin Karin in ka badan SL\$500.
- In ay Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu dib u eegis ku samayso Tacriifadda cashuurta daruuriga ah ee ay ku jirto Daqiiqda iyo Saliiddu, lagana yareeyo cashuurta badeecadahan, haddii aanay saameyn ku yeelanayn miisaaniyadda Qaranka.

¹ Xogtani waxa laga soo xigtay warbixinta Wasaaradda ee kormeerka iyo lasocoshada meciishadda Dalka

- Inay Wasaaradda Maaliyaddu samayso Daraasad laxidhiidha Cashuurta laga qaado daqiiqda iyo saamaynta ay ku yeelanayso miisaaniyadda qaranka, haddii laga yareeyo.
- Inay Wasaaradda Ganacsiga iyo Dalxiisku diiwaangaliso dhamaan iskaashatooyinka ganacsato, loona sameeyo guddi ay horumuud ka tahay Wasaaraddu. Isbadal kasta oo ku yimaadda iskaashatadana lagu soo wargeliyo Wasaaradda.